XEERKA HABAKA MADANIGA SOOMALIYEED

SUAALO IYO JAWAABO

1:Sidee lagayeelayaa dacwadii socotay intalagugudajiro xallinta khilaafaadka ka dhasha awoodaha garsooridda ee Maxkamadaha?

Jwb: Duritaanka ku saabsan kala saaridda habka ikhtisaaska garsooridda iyo awoodaha wuxuu hakinayaa dacwadda. - Hase yeeshee maxakamdda way u bannaan tahay in ay amarto in la qaado talaabooyin deg deg oo lagama maar maan ah.

2: Goormaa Garsooraha lagu dacweynkaraa mas'uuliyad madani ah oo la Xariirta Dacwad uu galay?

Jwb: :Garsooraha waxaa lagu dacweynkaraa mas'uuliyad madani ah oo laxiriirta Dacwad uu gaaday ama galay **labada xaalad ee soosocda:-**

A.Haddii uu sameeyo khiyaano ama wax isdabamarin, ama laaluusha ku qaato shaqadiisa.

B. Haddii uu diido ama ka tago ama dib u dhigo shaqo ka mid ah shaqooyonkiisa sabab aan la garwaaqsan Karin daradeed.

3: Ka hadal difaaca wakiillada dacwada amase qareennada waxa waajib ahaan looga baahan yahay kolka ay dacwad galayaan iyo sida ay darajooyinka Maxkamadaha ukala matalaan dalka ay wakiilka ay ka yihiin?

Jwb: Dhinacyada marka ay joogaan maxkamadaha darajooyinka laad iyo 2aad waxaay dacwadda geli karaan iyagoo aan kaalmeysan qareen. Laakiin marka ay dcawaddu gaarto makamadda sare waa qasab in dhinacyady kaalmeystaan qareen

---

4: Waa maxay waajibaadka saaran dhinacyada lyo Wakiillada am Qareennada inta dacwadu socoto?

Jwb: Haddii dhinac leeyahay qareen ama wakiil ka kaalmaynaya dacwadda waxaa waajibah in uu leeyahay qareenku wakaalad sidaas caddaynaysa.

Wakaaladda waxay ku egtahay **hal darajo** oo ka mid ah darajooyinka dacwadda, mana u bannaana wakiilka in uu ka heshiiyo ama ka noqdo dacwadda haddii aan si cad loogu sheegin wakaaladda wax ka duwan sidaas.

5:Maxaa loolajeedaa Garsoorka Madaniga ah?

Jawb: Waxa loola jeedaa Maxkomadaha ka garsoora kiisaska madaniga ah oo ay galaan Garsooreyaasha Moxkamadaha caadiga ah

---

6: Siyaabahee baa looga tegi karaa awoodda garsooridda Maxkamadaha Soomaaliyeed iyadoo la qaadanayo mid shisheeye?

Jwb: Hadii ay Dacwado ku Saabsantahay Qaan (Obligations) ka dhaxeysa Dad shisheeye ah ama Muwaadin Soomali ah iyo ajnabi oo aan ku nooleyn Soomaaliya ..

7:Siyaabahee baa qof ajnabi ah looga dacweyn karaa Maxkamadaha Soomaaliyeed?

Jwb: Inuu Deganyahay Soomaaliya ama uu kuleeyahay wakiil u Dacwoon karo

b)Inay Dacwadu ku saabsantahay Hanti, Dhaxal ama Qaan kadhalatay Soomaaliya

---

8: Sidee amase halkeebaa laga ogoan karaa Maxkamadda awoodda u leh iney qaaddo dacwad madani ah?

Jwb: Waxaa laga Ogaankaraa Maxkamada Awooda uleh Qaadista Dacwad Arjiga Dacwada uu sooqortay Dacwoodaha waa kolka arjigu waafaqsanyahay qodobka119 XHMS.

9: Sheeg siyaabaha maqnaashaha ikhtiscasyada ay usaameeyaan darajooyinka maxkamadeed ee kala duwan?

Jawb: Maqnaashaña ikhtisaaska Maadiga ah waxaa la soo jeedin karaa heer kasta lyo derejo kasta oo Maxkamadda ay joogto.

Hase yeeshee, maqnaashaha ikhtisaasyada Qiimaha lyo Deegaanka waxaa la soo jeedin karaa oo qura Darajada Koowaad ee Maxkamadda.

10:Maxkamaddee baa lala tegayaa dacwadaha la xirlira hanti maguunto ah iyo waajibaadyo ka dhashay qaan (Obligations)?

Jawb: Waxaa lala tagayaa Moxkamada kutaal meesha laga helo Hantida Guurtada, ama Maxkamada ay ku taalo meesha uu ka dhashay Waajibka ama halka ay khasabka tahay in lagu fuliyo

---

11:Ka hadal siyaabaha loo xallinayo khilaafaadka ka dhasha awooddaha garsooridda ee Maxkamadaha.

Jawb: Maxkamadaha dagmooyinka dhaxdooda ah iyo Maxkamadaha dagmooyinka iyo gobolka ah

waxaa xollintooda awood u Ieh Maxkamadda Racfaanka

Go'aannada ka soo baxa Maxkamdda Racfaanka ee la xíriira khilaafaadka ka dhasha awoodda garsooridda iyo ikhtisaaska waxaa racfaan looga qaadon karaa Maxkamadda Sare, marka laga reebo go'aanada ku saabsan ikhtisaaska deegaan oo goanka Maxkamadda Racfaanku noqonoyo mid kama dambeys ah.

Maxkamadda Gobolka iyo Maxkamodda Rocfaanka waxaa awood u leh xallintooda Maxkamadda Sare oo qura.

12:Ka hadal xaaladaha ay waajib ku tahay in Gorsoorka uga joogson karo galidda dacwada ?

Jawb: Waxaa garsooraha waajib ku ah in uu ka joogsado gelidda dacwada madaniga ah hadii ay jiraan xaalada soo socda: -

Jwb: Haddii uu leeyahay dano gaar ah, qaraabo la yahay dhinacyada, ama horey talo uga bixiyay dacwadda.

Haddii uu xanaaneeye ama shaqo siiye ama maamule uu usoo noqday dhinacyada midkood..

13:Ka hadal hawllaha ay kala qabtaan kaaliyaha Halwadenka iyo xeerbeegtida

Howlaho Kaaliyaha:-Sida uuqabo

a) Wuxuu qoraa wax allaale wixii tallabooyin ah ee uu qaadayo gorsooraha, dhinacyada iyo kaaliyaha qudhiisa.
b) Gorsooraha ayuu ka caawiyaa diyaarinta qoraalka dacwadda.
c) Waxuu saxiíxaa warqadaha gorsooruhu saxiixayo,

Howlaho Gaarsiiyaha:-Sida uuqabo

a) Wuxuu garsooraha ka kaalmeeyaa xagga fadhiga Maxkamadda.
b) Wuxwu fulinayaa Awaamirta garsooraha.
c) Wuxuna sameeyaa gaarsiinta waraaqaaha iyo masuliyadd kasta oo xeerku farayo.

14:Goormoon lagu qaadi karaa Kaaliyaha Maxkamada iyo gaarsiiyaha maxkmada masuuliyad madani ah?

Jawb: Kaaliayah iyo gaarsiiyaha maxkamada waa lagu qaadi karaa masuuliyadda madani ah oo waa la dacween karaa labada xaalad ee soo socdo

A. Haddii ay diidaan ama ay dib'u dhigaan gudashade, wadjibaadkooda shaqo.

B. . Haddii ay ku kacaan Tallabooyin baadil ah ama gaf culus ah si kas ah

---

15: Ka hadal sifada nooca dadka wax dacweyn karaa? Kuwa aan wax dacweyn karinna waa kuwee, sidee beyna xaqooda ku heli karaan?

Jwb: dadka wax dacweyn karaa waa dadka leh Shakhsiyadda qanuneed

Dacwadda ku saaabsaan qofka leh shakhsiyadda qaanuuneed waxaa la geynayaa xafiiska qofka matala (Representative).

Kuwa aan wax dacweyn Karin na waa kuwa aan leheen Shakhsiyadda qanuneed

xaqooda neh waxa u qaadaya wakiilkisa ama qofka masuulka ka eh

---

16: Sheeg inta nooc oo ikhtisaasyo (Competences) ay leeyihiin Maxkamadaha. Mid walbana ka keen tusaale ?

Jwb:waa saddex ikhtisaas oo kala ah:

1. **Ikhtisaas Mowduuc ah**, arrimaha qoyska oon loo eegeyn qiimaha
2. **Ikhtisaas Qiime ah**, Maxkamadaha degmooyinku waxey ikhtisaas uleeyihiin dacwadaha qiimahoodu yahay ilaa 3000Sh So,
3. **Ikhtisaas Deegaanka** ay Maxkamadda dacwada qaadeyso kutaal.

17: Ka hadal ikhtisaasiyada Maxkamadaha Degmada, Gobolka, Racfaanka iyo Sare

Jwb:Ikhtisaaska Maxkamadda Degmada: Waxay awood u leedahay Dacwad Qiimaheedu ka badnaan Ilaa **3000 Sh.S** iyo Dacwadaha xariirta **Qoyska** iyada oo aan loo fiirinayn Qiimaha.

Gobolka: Waxay awood u leedahay Dacwad Qiimaheedu ka badantahay 3000 Sh.S,

Racfaan/Sare: Rafcaan iyo khilaaf sharci.

18:Sidee buu yeelayaa Garsooraha haddii isla hal dacwad laga furo garsooreyaal kala duwan?

Jwb: Dacwadda waxay ka soconaysaa maxkamaddii laga furay markii hore, garsooraha dambe wuxuu baabi'inayaa dacwada

---

19: Sidee buu yeelayaa Garsooraha haddii dacwado isku xiran laga hor oogo garsooreyaal kala duwan?

Jwb: Garsooruhu wuxuu amrayaa in loo wareejiyo Garsooraha awoodda u leh dacwadda asalka ah ama Garsoorihii markii ugu horreysay laga horfuray.